

Saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality) Waxay Ina Siinaysaa Aragtiyo Ku Saabsan Sida Looga Hortago Rabshadaha

Waa maxay saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality)?

Saamaynta isku wada xiriirsan(intersectionality) waa siyaabaha ay noocyo badan oo dulmi ahi midba midka kale isula falgalaan si ay u saameeyaan shakhsiyaadka iyo bulshooyinka. Dhinac kasta oo ka mid ah aqoonsiga qofka, sida qowmiyadiisa, jinsiga, lab/dhegid, jinsi doorashada, xaalada, naafanimada, iyo da'da ayaa saamayn kala duwan ku yeelanaysa sida ay qofkaas nolol maalmeedkiisa ula dhaqmaan dadka, nidaamyada iyo qaababka ku xeerani taas oo saamayn xooggan ku yeelan karta caafimaadka. Marka uu qofku ka tirsan yahay in ka badan hal koox oo wajahaysa takoor ama sinnaan la'aan, tan ayaa waxay u saamayn kartaa caafimaadkooda siyaabo gaar ah iyadoo kordhinaysa ama badinaysa tirada sinnaan la'aanta ee ay la kulmaan. Saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality) waa muraayad muhiim u ah shaqada ka hortaga sababtoo ah waxay muujinaysaa sida noocyada kala duwan ee dulmigu u wada shaqeeyaan si ay u abuuraan noocyo kale oo faa'iido iyo khasaareba ah.


Taariikhda ereyga saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality)

Dadka Madow ee u dooda dumarka, aqoonyahannada, iyo dadka u dooda waxay taariikh dheer u leeyihiin sahaminta siyaabaha ay dadka u saameeyaan noocyada dulmiga isbiirsaday. Tusaale ahaan, Bayaanka Combahee River Collective ee la daabacay 1977-kii ayaa ka hadlay sida takoorka qowmiyada, jinsiga, iyo xaalada ee ay isku mar ula kulmeen dumarka Madowga ah. Ereyga saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality) waxaa 1989 soo saartay aqoonyahan Maraykan ah oo ah qareen xuquuqda madaniga ah Prof. Kimberlé Crenshaw, JD, LL.M., Crenshaw waxay ogaatay in haweenka madowga ah inta badan laga saaray doodaha ku saabsan aragtida u doodista dumarka iyo xeerarka ka hortaga cunsuriyada, taas oo diiradda saaraysay waayo-aragnimada iyo baahida caddaanka. Dumarka iyo ragga Madow, siday u kala horreeyaan. Waxay ku dooday in midab takoorka iyo jinsi-takoorku ay isla falgalaan si ay u abuuraan noocyo gooni ah oo xoog badan oo takoor ah. Crenshaw waxay ku dhiirigelisa dadka u dooda haweenku inay ku daraan falanqaynta jinsiga, iyo in dadka u dhaqdhaqaaqa Madowgu ay ku soo daraan falanqaynta takoorka jinsiga iyo hogaaminta aabbaha (patriarchy), si dumarka Madow labadoodaba loogu daro aragtidooda xoraynta.^{i, ii}

Caqabadaha ay wajahayso ka hortaga rabshaduhu

Saamaynta isku wada xiriirsan(intersectionality) waxay caawisaa sharaxaad qoto dheer oo ah kordhitaanka sinnaan la'aanta raacaysa laymanka kala duwanaanshaha ee awooda bulsheed. Tan waxaa ka mid ah kororka xooggan ee ku yimid rabshadaha dhibaataaynta. Daraasad la daabacay 2024 ayaa baaritaan ku samaysay heerarka dhacdooyinka rabshadaha ee ardayda

fasalka 9aad iyo 11aad ee dhalinyarada Minnesota ee qaadatay Ra'yi ururinta Ardayda Minnesota (MSS) sanadkii 2019. Daraasadu waxay ogaatay in 7.6% dhammaan dadka jawaabta bixiyey ay la kulmeen rabshado galmo oo uga yimid qofka ay xirrirka leeyhiin. Si kastaba ha ahaatee, boqolkiiba inta u korodhay ilaa 32% ee dadka jawaabta bixiyey ee sheegtay in ay yihiin Madow, Dadka Asaliga ah, ama ardayda midabka ah (BIPOC), oo lagu daray dadka dumarka khaniisiinta ah, khaniiska, labada jinsiba ah, queer, pansexual, ama su'aal ka qaba jinsigooda (LGBQ+), iyo kuwa lagu calaamadeeyay lab dhalashada, oo lagu daray kuwa ahaa transgender, jinsiga, jinsiga, ama dadka aan hubin aqoonsigooda jinsiga. Natiijoyinka ka soo baxay falanqaynta ayaa xaqiijiyay waxa dadka ku howlan ka hortagu ay hore u ogaayeen: dadka da'da yar ee la kulma noocyo badan oo cadaadis ah waxay soo sheegaan heerar sarreeya oo dhibaataaynta rabshadaha ah.ⁱⁱⁱ



7.6% dhammaan dhalinyaradu waxay la kulmeen IPSV, laakiin kooxdaas dhexdeeda waxaa jiray kooxo cayiman oo tirada boqolkiiba ay aad uga sarreeyaan.

32% dhallinta loo qoondeeyay in ay lab yihiin markii ay dhasheen, ee sheegay inay yihiin LGBQ+, dad jinsiga beddeshay ama aan hubin aqoonsiga jinsigooda, ee ah dadka midabka ah (BIPOC) ayaa la kulmay IPSV.



Rabshadaha marna ma keenin dhibanayaasha ama aqoonsigooda. Sinnaan la'aanta rabshadaha waxaa sababa kala duwanaanshaha awoodda bulshada ee jinsiga, lab/dhedig ahaanta (gender), jinsi doorashada, xaalada, naafanimada, da'da, iyo in waxyaabo badan. Warqadeedii 1989, Prof. Crenshaw waxay sharaxday in sinnaan la'aantani lagu abuuray iyadoo loo marayo siyaasado waxyeello leh, caqiidooyin, ficillo, habraacyo, qaabab, nidaamyado, deegaano, taariikho, iyo waxyaabo kale ee qaabeeya oo ilaaliya kala duwanaanshaha awoodaha bulshada. Waa mas'uuliyada dadka u dooda ka hortaga rabshadaha inay ku daraan falanqaynta midab takoorka, takoorka jinsiga, nacaybka khaniiska, nacaybka dadka jinsiga beddeshay, ku takoorka qofka awoodiisa, takoorka soo galootiga, takoorka xaalada ku salaysan, iyo noocyada kale ee dulmiga in lagu daro shaqada ka hortaga rabshadaha

Ficil samee si aad uga hortagtaan rabshadaha.

- Ku biira Shabakada Kahortaga Rabshadaha Galmada (Sexual Violence Prevention Network [SVPN]) si aad ula xiriirtaan dadka kale oo aad wax uga barataan khayraadka ka hortaga. Iska diwaangeliya [websaydka SVPN](https://www.health.state.mn.us/communities/svp/svpn.html) (<https://www.health.state.mn.us/communities/svp/svpn.html>).
- Hoos ka akhri warbixinta oo ku hoos jirta qaybta "Resources on inequities in Minnesota" ("Khayraad ku saabsan sinnaan la'aanta Minnesota") ee qaybta hoose.
- Minnesota waxay leedahay barnaamijyo bulshooyinka gaar u ah, hay'ado, iyo khayraad. Soo ogaada qaar agagaarkiina ka jira, akhriya waxyaabahooda ku jira khadka internetka, isu

diiwaangeliya warsidahooda, oo la xiriira si aad wax uga ogaataan sida aad u taageeri kartaan shaqadooda oo aad u wada shaqayn lahaydeen.

- Ka wada hadla saamaynta isku wada xiriirsan(intersectionality) Ku dara taariikhdeeda oo aqoonsada Prof. Kimberlé Crenshaw iyo dadka kale ee u dooda dumarka madow iyo aqoonyahannada abuuray fikrada.
- Aqoonsada saddex fikradood oo ku saabsan waxa ay saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality) kaaga dhigan tahay doorkaaga ama mashaariicda hadda ee ka hortaga rabshadaha. La wadaag fikradahan qof kula shaqeeya ama saaxiib. Weydii inay la yimaadaan saddex fikradood oo ay dib kuula wadaagaan. Tani waxay caawinaysaa in ay caadi noqoto in la isticmaalo in wax lagu fiiriyo diirada saamaynta isku wada xiriirsan(intersectionality) .
- Ka faa'iidaysta awoodda iyo mudnaanta aad ku leedihiin doorkiina (doorarkiina) si aad u hubisaan in shaqadiinu ay salka ku hayso saamaynta isku wada xiriirsan(intersectionality). Tusaale ahaan, tallaabada ficilka waxqabad ee loogu talagalay maareeyaha rugta caafimaadku waxa ay noqon kartaa in uu kala kulmo hoggaanka sare wax ka beddelka habraaca ama xeerarka jira ee ku salaysan talada hay'adaha iskaashatada ah ama xubnaha bulshada.
- U dooda xeerar maxali ah oo horumarin doon sinnaanta, cadaalada dhaqaalaha, ama bulshooyin isku xiran.

Ilo ku saabsan sinnaan la'aanta Minnesota

Hogaamiyayaasha iyo bulshooyinka Minnesota waxay abuureen ilo xogeedyo dhowr ah oo caawinaya inay sharaxaan sida nidaamyada xiriirsani ay u saameeyaan dadka Minnesota. Hoos waxaa ku yaalla dhowr tusaale:

- [Warbixinta ku saabsan Rabshadaha ka dhanka ah Haweenka iyo Carruurta Aasiyaanka ah ee Minnesota](https://www.health.state.mn.us/communities/equity/reports/violence/finalreport.pdf)
(<https://www.health.state.mn.us/communities/equity/reports/violence/finalreport.pdf>)
- [Qorshe Dhammaystiran ee ka Hortaga Xad-gudubka iyo Dayacaadda Dadka Naafada ah](https://mn.gov/olmstead/assets/2018-01-22%20Comprehensive%20Plan%20for%20Prevention%20of%20Abuse%20and%20Neglect%20of%20People%20with%20Disabilities%20Report%20-%20Final%202-23-18%20tcm1143-468155.pdf)
([https://mn.gov/olmstead/assets/2018-01-22 Comprehensive Plan for Prevention of Abuse and Neglect of People with Disabilities Report – Final 2-23-18 tcm1143-468155.pdf](https://mn.gov/olmstead/assets/2018-01-22%20Comprehensive%20Plan%20for%20Prevention%20of%20Abuse%20and%20Neglect%20of%20People%20with%20Disabilities%20Report%20-%20Final%202-23-18%20tcm1143-468155.pdf))
- [Garden of Truth: dhillaysiga iyo ka ganacsiga Haweenka Hindida Dhaladka ah ee Minnesota](https://www.niwrc.org/sites/default/files/images/resource/Garden-of-Truth.pdf)
(<https://www.niwrc.org/sites/default/files/images/resource/Garden-of-Truth.pdf>)
- [Warbixinnada Dilalka: Xadgudubka Xiriirka ee Minnesota](https://www.vfmn.org/reports) (<https://www.vfmn.org/reports>)
- [Latinas and Intimate Partner Violence: Xaqiiqooyinka ku salaysan caddaynta](https://esperanzaunited.org/wp-content/uploads/2021/11/3.11.73-Factsheet_GeneralIPV2021.pdf)
(https://esperanzaunited.org/wp-content/uploads/2021/11/3.11.73-Factsheet_GeneralIPV2021.pdf)

- [Koox Howleedka Haweenka Afrikaan Ameerikaanka ah ee La Dilay iyo kuwa Maqan: Warbixinta kama dambaysta ah \(https://dps.mn.gov/divisions/ojp/forms-documents/Documents/MMAAW%20full%20report%20final.pdf\)](https://dps.mn.gov/divisions/ojp/forms-documents/Documents/MMAAW%20full%20report%20final.pdf)
- [Koox Howleedka Haweenka Afrikaan Ameerikaanka ah ee La Dilay iyo kuwa Maqan: Warbixin u socota Sharci dejinta Minnesota \(https://dps.mn.gov/divisions/ojp/Documents/missing-murdered-indigenous-women-task-force-report.pdf\)](https://dps.mn.gov/divisions/ojp/Documents/missing-murdered-indigenous-women-task-force-report.pdf)
- [Shattered Hearts \(Qalbiyo jabay\): The Commercial Sexual Exploitation of American Indian Women and Girls in Minnesota \(https://static1.squarespace.com/static/5ac26062506fbee9f6d08994/t/5b846304c2241b8b6232900f/1535402767253/Shattered-Hearts-Full.pdf\)](https://static1.squarespace.com/static/5ac26062506fbee9f6d08994/t/5b846304c2241b8b6232900f/1535402767253/Shattered-Hearts-Full.pdf)
- [U.S. \(Warbixinta Gobolka Minnesota 2015\) 2015 Minnesota State Report \(https://transequality.org/sites/default/files/docs/usts/USTSMNStateReport\(1017\).pdf\)](https://transequality.org/sites/default/files/docs/usts/USTSMNStateReport(1017).pdf)

Ilo ku saabsan saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality)

- [Bayaanka Wadajirka ah ee The Combahee River \(https://americanstudies.yale.edu/sites/default/files/files/Keyword%20Coalition%20Readings.pdf\)](https://americanstudies.yale.edu/sites/default/files/files/Keyword%20Coalition%20Readings.pdf)
- [Ka bixinta takoorka ee halka ay iska jaraan Qowmiyada iyo Jinsigu \(Demarginalizing the Intersection of Race and Sex\):Naqdin ay Samaysay u doode dumarka Madow ku socota Fikradaha Ka soo Horjeedka Takoorka, Aragtida u Dooda Haweenka, Siyaasadaha ka soo Horjeedka Cunsuriyada oo ay Samaysay Kimberlé Crenshaw \(A Black Feminist Critique of Antidiscrimination Doctrine, Feminist Theory and Antiracist Politics by Dr. Kimberlé Crenshaw \(https://chicagounbound.uchicago.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=1052&context=uclf\)\)](https://chicagounbound.uchicago.edu/cgi/viewcontent.cgi?article=1052&context=uclf)
- [Fiidiyowga ku saabsan saamaynta isku wada xiriirsan\(intersectionality\) oo ay Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortaga Cudurradu \(https://youtu.be/LFx3zDQQ3Vw?si=3MVSuXwbPleGHd3M\)](https://youtu.be/LFx3zDQQ3Vw?si=3MVSuXwbPleGHd3M)

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
Unuga Barnaamijyada ka Hortagga Rabshadaha
625 Robert St. N.
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5000
health.violenceprev@state.mn.us
www.health.state.mn.us/communities/svp/index.html

05/14/2024

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-5400.

ⁱ Crenshaw, K. (1989). Ka bixinta takoorka ee halka ay iska jaraan Qowmiyada iyo Jinsigu (Demarginalizing the Intersection of Race and Sex):Naqdin ay Samaysay u doode dumarka Madow ku socota Fikradaha Ka soo Horjeedka Takoorka, Aragtida u Dooda Haweenka, Siyaasadaha ka soo Horjeedka Cunsuriyada. In K. T. Bartlett & R. Kennedy (Eds.), Aragtida sharci ee fikirka u doodista haweenka: Akhrisyada sharciga iyo jinsiga. (pp. 57–80). Routledge.

ⁱⁱ Ururka Qaran ee Iskuullada Madaxa Banaan. (2018, Juun 22). Kimberlé Crenshaw: Waa maxay saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality)? [Fiidyow]. <https://www.youtube.com/watch?v=ViDtnfQ9FHc>

ⁱⁱⁱ Cole, C., Raguette, M., Rider, G. N., & McMorris, B.J. (2024). Qodobada Saadaaliya Dhibaataaynta Xadgudubka galmada ee dadka ku jira xiriirka lammaanaha saaxiibka ee dhallinyarada: qaababka saamaynta isku wada xiriirsan (intersectionality) ee meeqaamka bulsho ee muunad gobolka oo dhan ah oo iskuullada ku salaysan Journal of Interpersonal Violence (Joornaalka Rabshadaha Shakhsiyaadka u Dhexeeya. 2024 Jan 16:8862605231221504. doi: 10.1177/08862605231221504. Epub ahead of print. PMID: 38229477.